# Dawlaadda Federaalka Soomaaliya
# Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda

Dib-u-eegid Sharciga Kalluumaysiga Soomaaliyeed, xeer lr. 23 oo soo baxay 30ka Nofeembar, 1985 si waafaqsan Qod. 79aad faqrada (d) ee Dastuurka Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaliya.

**TUSMO** **BOGGA**

**QEYBTA 1AAD**

**QODDOBKA 1AAD**

- XIGASHO…...…………………………………………………….……….….……....6

**QODDOBKA 2AAD**

- ERAY-BIXIN…..……………………………………………………..……….….……6

**QEYBTA 2AAD**

**QODDOBKA 3AAD**

**DHERERKA BADA SOOMAALIYEED**…………..…………………………………………7

**QODDOBKA 4AAD**

MAS’UULIYADDA WASAARADDA……………………..……………………………… 8

**QODDOBKA 5AAD**

MABAADI’DA MAAREYNTA KALLUUMAYSIGA………………….………………...8

**QODDOBKA 6AAD**

HORUMARINTA KALLUUMAYSIGA…………….…………………………………….9

**QODDOBKA 7AAD**

MAAMULKA KALLUUMAYSIGA……………………….…………………………….9

**QODDOBKA 8AAD**

MAAREYNTA KALLUUMAYSIGA……………………………………………………...10

**QODDOBKA 9AAD**

**MACLUUMAADKA KALLUUMAYSIGA IYO FAA'IIDAYSIGA FAAHFAAHINTOODA……..………………………………………………………… 10**

**QODDOBKA 10AAD**

- CILMI BAARIS ................…….……………………………………………..…..… 11

**QODDOBKA 11AAD**

- XADDIDIDA KALLUUMAYSIGA……………………………………………………...11

**QEYBTA 3AAD**

**QODOBKA 12AAD**

- DIIWAANGELINTA MARAAKIIBTA KALLUUMAYSIGA BIYAHA BADDA………12

**QODDOBKA 13AAD**

- HESHIISKA OGOLAANSHO KALLUUMAYSI…………………………..……...…..13

**QEYBTA 4AAD**

**QODDOBKA 14AAD**

- BIXINTA SHATIYADA GUUD AHAAN…………………………….……………....13

**QODDOBKA 15AAD**

- KALLUUMEYSIGA IYO OGOLAANSHAHA SOO GELIDA BIYAHA SOOMAALIYA……………………………………………..……………………......….13

**QODDOBKA 16AAD**

- BIXINTA SHATIGA EE MARAAKIIBTA QALAAD......................................................13

**QODDOBKA 17AAD**

- BIXINTA SHATIYADA MUWAADINKA……..……………………..………..………….....14

**QODDOBKA 18AAD**

- UJUUROOYINKA……………………………………………………………………......14

**QODOBKA 19 AAD**

- SHATI KALLUUMAYSIGA QALAAD……………………..…………..……………........…15

**QODDOBKA 20AAD**

- SHATIGA LAYSMA DHAAFSAN KARO…........…………………………………………..15

**QODDOBKA 21AAD**

- XAFIDAADA SHATIYADA......................................................................................................15

**QODDOBKA 22AAD**

- ISTICMAALKA SHATIGA..................................................................................................15

**QODDOBKA 23AAD**

**AWOODA BIXINTA SHATIYADA ..........................................................................................**16

**QODOBKA 24AAD**

- WAAJIBAADKA KALLUUMAYSATADA............................................................................16

**QODDOBKA 25AAD**

NOOLAYAASHA BADDA EE LA BADBAADINAYO…………………………………......….........16

**QODDOBKA 26AAD**

- KONTOROOLKA IYO BAARITAAN …........……………………………………….……...........17

**QODDOBKA 27AAD**

- SARKAALKA LOO XILSAARAY ……………........………………………………….……....…17

**QODDOBKA 28AAD**

- AWOODDA BAARAHA LOO XILSAARAY ………..........…………………….……….…....17

**QEYBTA 5AAD**

**QODDOBKA 29AAD**

- DEMBIYADA ……………………………………………........…………………….….……...18

**QODDOBKA 30AAD**

- GANAAXA…………………………………………………………..........……….…………....19

**QODDOBKA 31AAD**

- HANTI LA WAREEGID.........................................................................................................19

**QEYBTA 6AAD**

**QODDOBKA 32AAD**

- XAL MUSHKILADEEDYADA……………………………………….....……...........….…..….20

**QEYBTA 7AAD**

**WAXYAABAHA LA MAMNUUCAY**

**QODOBKA 33AAD**

**HABKA KALLUUMAYSIGA MAMNUUCA AH……………………….…………………….............**20

**QODOBKA 34 AAD**

**UGAARSIGA QUBADA IYO NAASLEYDA BADDA**…………………………………….............20
**QODOBKA 35 AAD**
**WASAKHAYNTA BIYAHA KALLUUMAYSIGA…**………………………………..…...............21
**QODOBKA 36AAD**
**BURBURINTA QOLOFQAREEDYADA……………………………………………..................21**

**QODOBKA 37AAD**
**WAXYEELIDA DHIRTA KA BAXDO XEEBAHA……………………………….................... 21**

**QODOBKA 38AAD**
**KA HAWLGELIDA GAADIIDKA KALLUMAYSIGA SHISHEEYAHA**……………................22

**QODOBKA 39AAD**
**KA SHAQAYNTA GUDAHA DALKA** ………………………………………………................22

**QODOBKA 40AAD**
XALALKA………………………………………………….……………………….................23
**QODDOBKA 41AAD**
- AWOODAFULINTA………………………………...………………………..….................23

**QODDOBKA 42AAD**
**XEERHOOSAADYADA**.........................................................................................................23
**QODOBKA 43AAD**
- BAABI'IN..................................................................................................................................24

**QODDOBKA 44AAD**
- **DHAQAN-GAL** …………………………..…………………….…………….....................24

## QEYBTA 1AAD

### QODDOBKA 1aad

### XIGASHO

Dukumintigan waxaa loo xigan karaa **'Sharciga Kalluumaysiga Sooomaaliyeed**.

### <u>QODDOBKA 2aad</u>

### ERAY-BIXIN

Ujeeddada xeerkan, eray walba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

1. **Wasaarad**: micnaheeda waa Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Soomaaliya.
2. **Wasiir**: micnihiisu waa Wasiirka Wasaaradda kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ee Soomaaliya.
3. **Noole Biyood**: waxaa loola jeedaa dhirta iyo xayawaanka ku nool biyaha, (marka laga reebo shimbiraha), oo ay ka mid yihiin kalluunka, qolofleyda, jamallada iyo xamaaratada ku nool biyaha dhexdooda, ukumaha qolofleyda ama naasaleyda ku nool biyaha iyo nooleyaasha kale ee sida dabiiciga ah looga helo biyaha.
4. **Kalluumaysi**: macnahiisu waa qaadashada, dabashada ama **qabsashada** kalluunka iyo noole biyoodyada kale nooc walba ee la qabto.
5. **Shatiga Kallumaysiga**: macnihiisu waa ruqsada la siiyo cid kasta ee codsata in ay ka kalluumaysato, ka shaqeysato, ka ganacsato ama cilmi-baaris ku sameyso wax-soo-saarka kheyraadka badda Soomaaliya **ee buuxisa shuruudaha kalluumaysiga**
6. **Markab Kalluumeysi**: macnihiisu waa huuri, doon, markab ama doomaha wax lagu raro ee loo isticmaali karo Kalluumaysiga.
7. **Bixinta Shatiga**: waa ruqsad ay Wasaaradda Kheyraadka Dalka siiso codsadaha soo qorta in la siiyo Shatiga Kalluumaysiga.
8. **Baare**: macniheedu waa qofka loo xilsaaro inuu noqdo xaqiijiye ama hubiye.
9. **Mulkiile**: waxaa loola jeedaa wixii la xiriira ama khuseeya maraakiibta kalluumaysiga ee haysta shatiga iyo cid kasta oo milkiile markab ama kireyste markab ah ama kireyste gaadiid badeed ah.
10. **Ilaalinta Noolaha Badda**: waxaa loola jeedaa naasoleyda badda, noole isku-isir ah ee qatarta ku jira iyo noole biyood, kuwaasoo laga dhawrayo in la ugaarsado.

11. **Noole Bartilmaameed ah**: macnaheedu waa noolayaasha la ogol yahay in laga kalluumaysto oo shatiga loo bixiyey.
12. **Loogga Markabka**: macnahiisu waa buugga loo yaqaan (Log) ee markabka looga baahan yahay waana in lagu xafido markabka gudihiisa kaasoo haysta shatiga.
13. **Calanka Qaranka**: waxaa loola jeedaa calanka qaranka markabka laga aqoonsaday inuu ka diiwaan-gashan yahay taasoo waafaqsan sharciyada caalamiga ah.
14. **Markab Kalluumaysi Qalaad**: waxaa loola jeedaa markab kasta ee loo isticmaalo kalluumaysi ama looga shaqeysto dhaqaale ama cilmi-baaris kheyraad badeed ee qalaad.
15. **Qabasho**: macnaheedu waa kheyraadka lagu qabtay qalabka Kalluumaysiga sida qalabka shabaqa lagu jiido, maqaalinta iyo qalabka shabag wareega.
16. **Qabasho–dhacdo**: macnaheedu waa noole kasta oo loo qabto si dhacdo ah iyo kuwa bartilmaameedka ahba.
17. **Dhulka Dejinta**: waxaa loola jeedaa waxyaabaha la soo qabtay oo dhulka lagu soo dejiyo.
18. **Keydinta Dejinta**: waxaa loola jeedaa qalabka kalluumaysiga ee lagu keydiyo gudaha markabka, lagana qaado meesha lagu isticmaalo caadi ahaan marka la kalluumaysanayo.
19. **Biyaha Beriga:** waa biyaha webiyada iyo biya qabatinada ay ku nool yihiin noole biyoodku

## QEYBTA 2AAD

### Qodobka 3 aad

## Dhererka Bada Soomaalia

A- Dhererka Xeebta bada Soomaaliyeed waa 3,333 Km oo balaceeduna yahay 200 Mayl badeed .

**B- Aaga gaarka u ah oo loo xadidey Kalluumaysatada soomaaliya ee degan xeebaha mamnuucana ka ah in cid kale ka kalluumaysato waa 12 Mayl Badeed**

**C- Aaga ilaalinta waa ilaa 24 Mayl Badeed waana aaga lagu ilaaliyo kalluumaysatada xeebaha oo aan loo ogolayn in Maraakiibta kalluumaysigu soo galaan oo ka kaluumaystaan. Waxaa gaari kara oo ka kalluumaysan karo kalluumaysatada xeebaha degan.**

**D- Aaga loo ogolyahay in Maraakiibta shatiga la siiyo ay ka kalluumaystaan waa wixii ka shisheeya 24 Mayl Badeed ilaa dharerka badda Soomaaliyeed oo dhan 200 Mayl Badeed, badweynta Indiya iyo badda Cas.**

## QODDOBKA 4aad

## MAS'UULIYADDA WASAARADDA

1. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay maareeynta iyo horumarinta kheyraadka badda ee Soomaaliya iyo meelmarinta xeerkan.

2. Wasaaraddu waxay ururinaysaa macluumaadka kheyraadka badaha iyo xogta kale ee la xiriirta kalluumeysiga, isuduwidda, maareynta iyo daabicidda xogta khuseysa dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga Soomaaliyeed iyo badbaadinta kheyraaddka.

3. Wasaaraddu waxaa kale oo ay mas'uul ka tahay in ay hirgeliso horumarinta dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga dalka, waxayna kordhin doontaa horumarinta dhaqdhaqaaqa kalluumeysiga maxalliga ah iyo kan casriga ahba iyo dhammaan waxyaabaha kale ee la xiriira, oo ay ka mid tahay maalgashiyada qalaad (foreign investments), kuwaas oo faa'iidooyin badan u leh mujtamaca ku nool xeebaha dalka.

## QODDOBKA 5aad

## MABAADII'DA MAAREYNTA KALLUUMAYSIGA

1. Wasaaraddu waxay hubinaysaa in noole-biyoodka iyo kheyraadka xeebaha Soomaaliya si habboon loo dhawro loona maamulo sida:

a) In la hubiyo in kheyraadka nool aan halis la gelin **lana dhawro iyaga iyo deegaankoodaba** iyadoo laga faa'iidysanayo.

b) In la hubiyo in kheyraadkaasi ay abuuraan wax-soo-saar habboon oo joogta ah, iyadoo la tixgelinayo bay'ada ku habboon dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

2. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa in ka-qeyb-qaadashada qaramada kale ee kheyraadka nool ee ku jira biyaha Soomaaliya si hab-sami ah loo kontoroolo ama loo maareeyo si loo hubiyo ka faa'iideysiga wadajirka ah ee kheyraadka, gaar ahaan maraakiibta waddaniga ah iyo maraakiibta kalluumaysiga shisheeye labaduba in aysan ka saro marin guud ahaan inta loo ogol yahay in ay qabtaan ee kheyraadkaas waqtiga ay Wasaaraddu u ogolaatay iyadoo la tixgelinayo cilmiga ugu habboon ee Wasaaraddu haysato iyo arrimaha kale ee khuseeya oo ay ka mid tahay dhibaatada dalagu u geysto noolaha ay ku tiirsan yihiin.

3. Wasaaraddu waxay horumarinaysaa siyaasadda Kalluumaysiga Badda, webiyada, biyo qabatinada iyo qorshaha saldhig u noqonaya xeerkan.

## QODDOBKA 6aad

## HORUMARINTA KALLUUMAYSIGA

1. Wasaaraddu waxay wada-shaqeyn iyo **wada tashi** la sameynaysaa hay'adaha **dawliga ah**, **kuwa dawliga ahayn** iyo waaxyaha kale ee dalka si ay u horumariso Kalluumaysiga xeebaha, warshadaha iyo waxyaabaha kale ee la xiriira warshadeyntooda iyadoo la qaadayo tallaabooyinka soo socda:

   A) Bixinta shaqo-fulinta adeegga tababarada;

   B) Qabashada cilmi-baarisyo;

   C) Kor-u-qaadista wada-sahqeynta u dhexeysa Wasaaradda iyo Kalluumaysatada;

   D) Kor-u-qaadida suuqyada wax-soo-saarka kheyraadka badda;

   E) Bixinta qalabka kaabayaasha; iyo

   F) Kor-u-qaadidda xirfadaha kaluumaysiga iyo abuuristoodaba.

## QODDOBKA 7aad

## MAAMULKA KALLUUMAYSIGA

1. Wasaaraddu waxay diyaarinaysaa ama keydinaysaa qorshaha maamulka iyo horumarinta kalluumaysiga biyaha Soomaaliya iyadoo ku saleynaysa barnaamijka horumarinta kalluumaysiga ee qorshayaashaas.
2. Qorshe waliba waa in uu:

   A. Caddeeyo Kheyraad-baarista ee kalluumaysi iyo qiimeynta xaaladda waqtigan uu ku sugan yahay ka-faa'ideysigiisu;

   B. In uu caddeeyo ujeeddooyinka la rabo in laga gaaro maareynta kalluumaysiga; iyo

   C. In uu caddeeyo barnaamijka shati-bixinta ee Kalluumaysi iyo qiimeynta xaaladda waqtigan uu ku sugan yahay ka-faa'ideysigiisu.
3. In la diyaariyo maareynta Kalluumaysi kasta iyo qorshaha horumarintiisa sida:

   A. in la tixgeliyo lana hago mabaadii'da lagu xusay qodobka **4 aad** ee xeerkan;

   B. in lala tashado dadka ku-hawlan kalluumaysiga, **maamul Goboleedyada** iyo cid kasta oo uu khuseeyo qorshaha dawladdu; iyo

   B. in la soo bandhigo qorshe qabyo ah ee khuseeya maareynta kalluumaysiga ee dhammaan gobollada dalka Soomaaliya.
4. Wasaaraddu waxay la-tashi ka sameynaysaa meel kasta oo suura-gal ah sida xukuumadaha,

maamulka kalluumaysiga ee dalalka kale ee gobolka guud ahaan, gaar ahaan kuwa aan wadaagno soohdimaha ama la xiriira noolayaasha iyadoo aragtida laga leeyahay ay tahay is- waafajin iyo sidii hor-u-kac loogu samayn lahaa maareynta kalluumaysiga ee gobolka oo dhan.

5. Wasaaraddu waxay soo saaraysaa war-side (journal) ama website si joogto ah loogu soo qoro qorsheyaasha iyo akhbaaraadka rasmiga ah oo kooban.

## QODDOBKA 8aad

## MAAREYNTA KALLUUMAYSIGA

1. Wasaaraddu waxay dejinaysaa xeerka la dhaqo maareynta ugu habboon kalluumaysiga.
2. Talaabooyinka loo dejiyey maareynta kalluumaysiga waxaa ku jira oo aan ku koobnayn:
   A. Xilli xirid meelaha loo xadiday noocyada Kalluumaysiga ama xaddidid hababka markabka loogu kalluumaysto; iyo
   B. Xadidid hababka iyo qalabka oo uu ku jiro isha cabbirkeeda, sifooyinka kale iyo noocyada lagu soo dejin karo iyo ka ganacsigooda.
3. Nidaaminta iyo dejinta kalluunka iyo maamul u sameynta meelaha lagu dejiyo.
4. Kontoroolka, wax-soo-saarka, kalluumeysiga ama ka soo saarista xayawaanka noole biyood kasta iyo dhirta ka timaada biyaha laga kalluumaysto ee Soomaaliya.
5. Wasaaraddu waxay nidaaminaysaa isla markaana dejinaysaa talaabooyin iyo maareyn mamnuucaya haysashada iyo soo-iibinta qalab kasta ee kalluun ama noole biyood kale haddii uusan lahayn ruqsad ay Wasaaraddu bixisay.

## QODDOBKA 9aad

## MACLUUMAADKA KALLUUMAYSIGA IYO AKHBAARAHA FAAHFAAHINTOODA

1. Wasaaraddu waxay ururinaysaa tiro-koobka macluumaadka iyo maareynta akhbaaraha dadweynaha ee khuseeya dhaqdhaqaaqyada kalluumaysiga Soomaaliya.
2. Wasaaraddu waxay samaynaysaa faaqidaad iyo soo-saarid tiro-koob iyo akhbaaro kale ee kalluumaysi.
3. Wasaaraddu waxay ka dalbanaysaa cid kasta oo ku hawlan kalluumaysiga iyo dhaqdhaqaaqyadda la xiriira in ay u soo gudbiyaan macluumaadka khuseeya shaqooyinkooda sida ugu haboon sarkaalka loo xilsaaray.
4. Wasaraddu waxay la-tashi **iyo iskaashi** la samaynaysaa laamaha Jamhuuriyadaha, maamulada kalluumaysi ee dalalka kale iyadoo laga eegayo is-waafajinta iyo hagida tallaabooyinka maareynta iyo akhbaaro is-dhaafsiga kalluumaysiga.

## QODDOBKA 10aad

## CILMI-BAARIS

1. Markabka **laguma** isticmaali karo gudaha biyaha Soomaaliya cilmi-baaris la xiriirta Kheyraadka nool marka laga reebo ogolaanshaha Wasaaradda ama iyadoo la tixgelinayo shatiga kalluumaysiga uu haysto.
2. Wasaaraddu waxay u ogolaan kartaa ruqsad qoraal ah, cid kasta ama markab in uu kalluumaysto isagoo ujeeddadiisu tahay in uu sameeyo cilmi-baaris cilmiyeysan isagoo dhawraya xaaladaha ay Wasaaraddu u dejisay, **isla markaana laga qayb geliyo aqoon yahano Soomaaliyeed** markii aysan ku caddeyn xeerkan.
3. Wasaaraddu waxay gacan-siinaysaa isla markaana dhiiri-gelinaysaa awoodda cilmi-barista muwaadiniinta Soomaaliyeed si loo gaaro wax-soo-saar sarreeya.

## QODDOBKA 11aad

## XADDIDIDA KALLUUMAYSIGA

Meelaha looga baahan yahay xaddidaada maareynta ku habboon ee cadadka dadka, maraakiibta, shabaagadaha ama xaaladaha kale ee looga shaqeeyo kalluumaysiga, Wasaaraddu waxay ogeysiin ku **bixinaysaa** wargeyska rasmiga ah ee Jamhuuriyada iyo waxyaabaha kale ee wararka lagu baahiyo meelaha xaddidaadaas laga doonayo, sida:

A. Fasax-bixin ama shatiyo cusub;
B. Ku khasbid shati gaar ah ama cashuur bixin; iyo
C. Kala fadilid shati bixin ee kalluumaysiga kale.

## QEYBTA 3AAD

## QODDOBKA 12aad

## DIIWAAN-GELINTA MARAAKIIBTA KALLUUMAYSIGA

1. Wasaaraddu waxay **siinaysaa** shati kalluumaysi maraakiib ka kalluumeysata biyo-badeedka Soomaaliya ayadoo la tixgelinaayo dawlad goboleedyada ee markabkaasi ka howlgalayo.

2. Wasaaraddu waxay **siinaysaa** codsadayaasha shatiga kalluumaysiga ay u baahan yihiin, iyagoo heli doona diiwaangelin maraakiibtooda oo ansax ah.
3. Cidna ma isticmaali karto markab in uu ka kalluumaysto biyaha Soomaaliya isagoo aan haysan shahaadada ruqsadda diiwaan-gelinta markabka oo ansax ah.
4. Shahaadada diiwaan-gelinta ee habsamida loo bixiyey waxaa loo isticmaali karaa bixinta lacagaha cashuuraha loo fasaxay milkiilaha ama markabka.
5. Cid kasta oo isticmaasha markab si ay uga kalluumaysato biyaha Soomaaliya iyadoon haysan shati diiwaangashan ee markabkeeda oo ansax ah, wuxuuna noqon doonaa eedaysane la horgeeyo sharciga dalka u yaal si loogu qaado fal-dembiyeedka uu galay.
6. Arjiga shahaadada kalluumaysiga waa qoraal, waxaana si kooban loogu muujiyaa arrimaha soo socota:
   A. Magaca, faahfaahinta markabka, calanka iyo dalka uu ka diiwaangashan yahay;
   B. Magaca Milkiilaha, kireystaha, haddii uu jiro kabtanka/naaquudaha markabka;
   C. Cinwaanka mulkiilah ma kireystaha
   D. Dhereka iyo Ballaca Markabka
   E. Goobta lagu dhisay iyo waqtiga
   F. Miissankiisa celcelis ahaan iyo Miisaankiisa dhabta ah
   G. Awooda Matoorka saran iyo noociisa
   H. Tirada shaqaalaha iyo dhalashooyinkooda
   I. Diiwaanka qorista waxsoosaarka waa inuu saran yahay markabka
   J. Calaamooyinka loogu yeero, qalabka badda lagu maro iyo kaabayaasha ku rakiban gudaha markabka;
   K. Faahfaahinta hawlaha kalluumaysi ee uu soo dalbaday iyo saxiixa codsadaha;
   L. Nooca kalluumaysiga la rabo in laga kalluumaysto;
   M. Muujin sida ama qaabka loo kalluumaysto;
   N. Hababka kalluumaysiga iyo qalabka;
   O. Hababka wax-soo-saarka ee la adeegsanayo, faahfaahinta suuqgeynta, meesha ugu dambeysa ee la geynayo wax-soo-saarka iyo isticmaalka wixii la soo saaray;
   P. Faahfaahin meesha laga kalluumaysanayo;
   Q. Tirada kalluunka ama xoolo-biyoodyada kale ee la qabanayo;
   K. Waqtiga shatiga uu ansax yahay (validity of licence);
   L. In la qeexo kaaliyeyaasha horjoogaha maamulka (kabtanka), magacyadooda iyo shahaadooyinka ay haystaan; iyo wadamada ay u dhasheen
   M. In ay u soo gudbiyaan Wasaaradda “Akhbaar kasta ee la soo codsado”.
   **N.** Waa inuu xafiis ku leeyahay dalka gudihiisa**.**

## QODDOBKA 13eaad

## HESHIISKA OGOLAANSHO KALLUUMAYSI

Wasaaraddu waxay samaynaysaa wadatashiyo haddii loo baahdo, waxayna heshiisyo la geli kartaa dawlad kale iyo hay'ado caalami ah oo dawladuhu u-xil-saarteen awoodda ka wada- hadalka heshiisyada kalluumaysi.

## QEYBTA 4AAD

## QODDOBKA 14aad

## BIXINTA SHATIYADA GUUD AHAAN

1- Iyadoo aan la kala soocin waxaa shati kaluumaysi la siin karaa cid kasta oo buuxisa shuruudaha xeerkan u degsan.
2- Kallumaystada Soomaaliyeed waxay yeelan doonaan mudnaan gaar ah ee ogolaanshaha kalluumaysiga iyo shati siintaba.

## QODDOBKA 15aad

## KALLUUMEYSIGA IYO OGOLAANSHAHA SOO GELIDDA BIYAHA SOOMAALIYA

1. Markab qalaad waa in uusan ka kalluumaysan iskuna dayin inuu ka kalluumaysto ama uu ka qeyb-galo shaqooyin kalluumaysi gudaha biyaha Soomaaliya isaga oon haysan shatiga ansax ah ee ku soo baxay xeerkan.
2. Markab kasta ee kalluumaysi ee soo gala biyaha Soomaaliya asaga oon haysan shati ansax ah, waa in la horgeeyaa Maxkamadaha Garsoorka si loogu qaado sharciga u degsan kalluumaysiga Soomaaliya.
3. Markab kasta ee kalluumeysi oo soo gala biyaha Soomaaliya ayna ku caddaato in uu jebiyey qodobka 11aad ee xeerkan, wuxuu noqonaaya dambiile lagu fuliyo xeerkan.
4. Dhamaan maraakiibta kalluumaysiga qalaad ee doonaya xuquuqda ka-hawl-galka gudaha biyaha Soomaaliya waxay u baahan yihiin ruqsad gelitaan oo ay ka helaan Wasaarada Kheyraadka Dalka.

## QODDOBKA 16aad

## BIXINTA SHATIGA MARAAKIIBTA QALAAD

1. Dhammaan shatiyada kalluumeysi ee la bixiyey intii u dhexeysay Janaayo 1991 iyo kahor inta dib-loo ansixiyey (ratified) sharciga kalluumeysiga Soomaaliya, oo ay ansixiyeen maamulada gobollada ama dawladdihii ku-meel-gaarka ahaa ee is-daba joogay ee Soomaaliya, waxaa loo aqoonsan yahay kuwo aan ansax ahayn, markuu dhaqangal noqdo xeerkani.

2. Codsadaha shatiga ee markabkiibta kalluumaysiga qalaad waa in uu arjigiisa oo qoraal ah u keeno Wasaaradda sida ku qoran dukumintiga warbixinta lagu buuxiyo (foom).

3. Wasaaraddu waxay bixin kartaa shatiga maraakiibta kalluumeysiga qalaad markii:
   A. Ay go'aansato in ay jiraan kheyraad kalluumaysi oo dheeri ka ah shaqooyinka kalluumaysiga u-gaarka ah Soomaalida; iyo
   B. Marka ay go'aansato in tirada dheeriga ah ee laga kalluumeysan karo iyo tusmoooyinka cadad ahaan ay ku xiran tahay bixinta shatiga.
4. Shatiga markabka kalluumaysiga qalaad waa in uu u hogaansan yahay shuruudaha shati qaadashada ee xeerkan ku tilmaaman.

## <u>QODDOBKA 17aad</u>

## BIXINTA SHATIGA KALLUUMEYSIGA MUWAADINKA

1. Waxaa laga dhafay shatiga kalluumeysiga in la siiyo noocyada doonyaha soo socda:
   A. Kuwa matoor la'aanta ah;
   B. Kuwa Matoorka leh balse dhererkoodu dhaafsiisneyn afar mitir; ama
   C. Kuwa Loo isticmaalo kalluumeysi madadaalo keliya.
2. Codsade kasta oo wadani ah ee doonaya shati markab kalluumaysi waa in uu arji qoraal ah u soo gudbiyaa Wasaaradda, waana in ay ku jiraan akhbaaraha ku tilmaaman xeerkan (Foomka shatiyada).
4. Muwaadin kasta ee doonaya shatiga markab kalluumeysi qalaad, waa in uu u hoggaansan yahay xaladaha la doonayo in ay waafaqaan iyagoo adeegsanaya talaabadda maareyntooda iyo lacag-bixinta u degsan (lacagta la siiyo Jamhuuriyada ama lacagaha dul-saarka ah).

## <u>QODDOBKA 18aad</u>

## UJUUROOYINKA

1. Ujuurooyinka (fees or charges) laga bixinayo ee la xiriira muwaadinka doonaya shati markab kalluumeysi waa la daabacayaa, waxaana go'aaminaya **Wasaarada waxaana wareegto kusoo saaraya wasiirka**, iyadoo loo qaybinayo dhammaan inta haysata shatiyada xiligan la joogo iyo qaybaha kale ee ay khusayso.
2. Markab wadani waa in uusan kalluumaysan haddii aan laga saamixin qodobka 11aad ee xeerkan.
3. Wasaaraddu waxay ka saamixi kartaa **cidii mutaysata** oo leh maraakiib kallumeysi oo wadani ah waxyaabaha uu ka doonayo xeerkani, taasoo ku xiran xaaladaha Wasaaraddu soo jideysay.
4. Arji Shati ku habboon kadib **marka ay jirto duruufo jira awgeed**, iyadoo la tixgelinayo maraakiibta kalluumaysi ee wadaniga ah marka sarkaalka shatiyada bixiya uu si macquul ah ugu qanco, waa laga saamixi karaa ujuurooyinka ku baaqday.

**QODDOBKA 19aad**

**SHATI KALLUUMAYSIGA QALAAD**

Shati kalluumaysi ee lagu bixiyey xeerkan waa in uu ahaadaa ansax muddo aan ka badnayn hal sano.

**QODDOBKA 20aad**

**MAMNUUCIDA ISDHAAFSIGA SHATIYADA**

Waa in shatiga kalluumaysi ee lagu bixiyey xeerkan aan loo gudbin ruux labaad haddii aysan jirin ogolaansho Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.

**QODDOBKA 21aad**
**XAFIDAADA SHATIYADA**

Shatiga kalluumaysiga waa in lagu xafido gudaha markabka Kalluumaysiga ee leh ruqsada, waana in laga heli karo marka uu weydiisto sarkaalka loo xilsaaray.

**QODDOBKA 22aad**

**ISTICMAALKA SHATIGA**

Isticmaal kasta ee shatiga kalluumaysiga ee hoos yimaada xeerkan, waa in laga helaa habka iyo hannaanka xeerkani u dejiyey.

## Qodobka: 23 aad

## Awoodda bixinta Shatiyada

1- Awooda bixinta shatiyada waxaa iska leh oo bixinaya Jamhuuriyada fedraalka Soomaaliya iyadoo lala tashanayo dawlad goboleedyada meelaha khuseeya.

2- Sida ku cad Qod.54 aad ee dastuurka federaalka Soomaaliya, inta laga soo saarayo xeer qexayo awood qaybsiga siyaasadda iyo dhaqaalaha, waxaa ka wada xaajoonayo xukuumada federaalka Soomaaliya iyo dawlad goboleedyada sidii ay u qaybsan lahaayeen dhaqaalaha kasoo baxaayo Kalluumaysiga.

## QODDOBKA 24aad

## WAAJIBAADKA KALLUUMAYSATADA

Cid kasta ee la siiyey shati kalluumaysi waxaa waajib ku ah in:

A. Ay u hogaansanaato sharciyada dalka iyo xeerarka Wasaaradda;
B. Ay Soo gudbiso warbixin joogto ah ee shaqooyinka Kalluumaysiga ay ku hawlan tahay, cadadka iyo noocyada noole-baddeed ee lagu qabto si lama filaan ah.

## QODDOBKA 25aad

## NOOLAYAASHA BADDA EE LA BADBAADINAYO

(**Noolayaasha khatarta ku sugan**)

1. Waa in aysan cidna ka kalluumaysan nooleyaasha khatarta ku sugan ee gudaha biyaha Soomaaliyeed.
2. Nooleyaasha khatarta ku sugan ee lagu qabto si lama-filaan ah waa in la sii daayo isla markaana lagu celiyo biyaha badda.
3. Marka laga reebo qoraal ogolaasho ee Wasaaradda, cidna ma qaadan karto ama ma burburin karto dhagaxa quruxda badan ee jamalada badda (Coral reefs), geedaha xeebta oo biyaha badda ku nool (Mangroove trees) iyo qolof baddeedyada.

## QODDOBKA 26aad

## KONTOROOLKA IYO BAARITAANKA

1. Cid kasta oo ku hawlan shaqooyinka kalluumaysiga waa in ay u hogaansantaa in la baaro ama la kormeero mar kasta oo loo baahdo, Baaritaanka iyo kormeerka waxaa fulinaya cidii ay u xilsaarto Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.
2. Cid kasta ee ku xad-gudubta hanaanka u degsan xeerarkan waa in loo kaxeeyo dekeda ugu dhaw ee dalka.
3. Markab ama cid kasta oo dembi ku gasha gudaha biyaha Soomaaliya, shati iyo shati la'aan una gudubta xadka dalka kale, waa la xukumayaa iyada oo maqan iyadoo la tixgelinayo sharciyada caalamiga ah.

## QODDOBKA 27aad

## SARKAALKA LOO XILSAARAY

Wasaaraddu waxay u xilsaari doontaa muwaadin ka tirsan wasaarada in u noqdo sarkaal u xilsaaran fulinta xeerkaan.

## QODDOBKA 28aad

## AWOODA BAARAHA LOO XILSAARAY

1. Baare kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu baaro meel kasta ee lagu tuhmayo in lagu hayo kalluun ama kheyraad kale oo lagu keenay si aan waafaqsaneyn xeerkan.
2. Baaruhu wuxuu xaq u leeyahay in u baaro meelaha Kalluunka lagu abuurayo, diyaarinayo, hagaajinayo ama lagu keydinayo.
3. Baaruhu wuxuu xaq u leeyahay in uu qaado muunad (Sample) kheyraadka uu hawlan yahay.
4. Kalluun kasta oo aan ku habboonayn in dadku cuno ama jiran ama si kale cudur faafa u leh, si toos ah ayaa loola wareegayaa.
5. Baaruhu wuxuu awood u leeyahay in uu joojiyo isla markaana dul-fuulo markab kasta ee ku jira gudaha biyaha Soomaaliya, si uu u hubiyo xamuulkiisa, kalluunka iyo qalabkiisa.
6. Cid kasta ee lagu caddeeyo xad-gudub (dembi) waa in la hor-keeno Maxkamad Garsoor sida ugu dhaqsaha badan.
7. Sarkaal kasta oo loo xilsaaro baarid waa in uu wataa aqoonsi buuxa, islamarkaana uu soo saaraa markii la weydsto ama loo baahdo aqoonsigiisa.

## QEYBTA 5AAD

## QODDOBKA 29aad

## DEMBIYADA

Shaqaalaha iyo naaqudaha markab kasta oo **ku xad-gudubo waxyaabaha la mamnuucay iyo qodobada kale oo hoos ku qoran waa denbiile waxaana laga qaadayaa talaabooyinkka soo socda:**:

1. Shaqaalaha ama naaqudaha markab kasta oo dembi ku geysta gudaha biyaha Soomaaliyaa waxaa la horgeynayaa maxkamad.
2. Qofkasta oo dembi ku gala gudaha biyaha Soomaaliya (ajnebi ama waddani) waxaa la hor- geynayaa maxkmad si loogu qaado fal-dembiyeedka uu galay.
3. Qof kasta oo isticmaalaya walxaha qarxa, sunta wax-suuxisa ama awood tirta kalluunka iyo noole-biyoodyada kale waxaa la horgeynayaa maxkamad awoodda u leh.
   Kalluumayste kasta oo ka horyimaada awaamirta Maamulka Wasaaradda **ee ku xusan xeerkan** , waxa la horgeynayaa maxkamad.
4. Kalluumaysata ugaarsada ama dhibaateeya naasoley-badeedda ama nooleyaasha kale ee khatarta ku sugan, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
6. Qofkii dhoofiya ama burburiya dhagaxda quruxda badan leh ee jamalada badda (corals), dhirta ka baxda xeebaha badda soo gaarto (mangroove tree) ama qolofley badeedka (shell) oo aan ruqsad qoraal ah ka haysan Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
7. Markab kasta oo aan haysan shatiga loo baahan yahay ama aan ka diiwaan-gashaneyn Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
8. Ciddii diida wararka iyo akhbaaraadka looga baahan yahay ama marin habaabisa saraakiisha Wasaaradda, waxaa la horgeynayaa maxkamad.
9. Markabkii ama diyaaradii gasha dembi ah wasakheyn ka timid haraaga warshadaha ama nukliyarka (industrial//nuclear waste dumps) kuwaas oo lagu shubo biyaha badda Soomaaliya waxaa la horgeyn doonaa maxkamad si loogu qaado xad-gudubkooda.

## QODDOBKA 30aad

## GANAAXYADA

1. Qofka lagu helo in uu galay fal-dembiyeed la xiriira qoddobka 29aad (1) waxaa lagu ganaaxi laga bilaabo US$50,000 – $500,000 (konton kun ilaa shan boqol oo kun oo dollar).
2. Sida ku cad qodobka 12aad (3 iyo 5), ciddii ay caddaato in uu galay fal-dembiyeedkaas, wuxuu mutaysan doonaa ganaax u dhaxeeya: US$ 50,000 -$100,000 (konton kun ilaa boqol kun oo dollar).
3. Qofkii lagu qabto isagoo isticmaalaya maadooyinka qarxa, qalabka ka-reeban kaluumaysiga, kaluumaysanaya xiliga bad-xireenka, burburiya jamal-badeedka ama dhir-badeedka

xeebta ama qolof-badeedka waxaa lagu ganaaxayaa US$ 500,000-$5,000,000 (Shan boqol oo kun ilaa shan malyan oo doollar).

4. Qofkii gala dembiga ku cad qodobka 29aad (2 ilaa 8) waxaa lagu xukumayaa ganaax u dhexeeya US$ 100.000 – $500.000 (boqol Kun ilaa shan boqol oo kun oo dollar).
5. Qofkii ama shirkadii gasha dembiga ku cad qodobka 29aad (9) waxaa lagu xukumayaa Ganaax u dhaxeeya US$ 100,000,000-$500,000,000 (Boqol Malyan ilaa shan boqol oo malyan oo Dollar) iyo qarashka sifaynta deegaanka waxyeelada gaareen.
6. Ganaaxyada doomaha yaryar (sida huuriyada) ee oo ku xadguduba Kalluumaysiga waxaa lagu ganaaxidoonaa sida soo socto:
   A. Ganaax US$ 200 – $400 (labo ilaa afar boqol oo doollar) ee doomaha yaryar oo matoor La'aanta ah.
   B. Ganaax US$ 700 – $1,000 (todobo boqol ilaa kun doollar) ee doon yar (huuri) matoor leh gaaraya 6 – 30 Horsepower (HP).
   C. Ganaax US $1,100 – $1,500 (kun iyo boqol ilaa kun iyo shan boqol oo doollar) doon yar (huuri) matoor leh gaaraya 31 – 60 Horsepower (HP).
   D. Ganaax US$ 1,000,000 – $10,000,000 (hal ilaa toban malyan oo doollar) doomaha waaweyn leh matoor gaaraya 101 Horsepower (HP) iyo ka badan.
   E. Halka dembigu uu aad halis u yahay ama dembiiluhu uu galo mar kale isku dembi arrinta waxaa la horgeynayaa maxkamada awooda u leh.
   F. Qofkii isagu diida in uu keeno warbixinta la doonayo ama fulin waaya xeerarkan waxaa lagu ganaaxayaa US$ 1,000 – 5,000 (kun ilaa shan kun doollar).
   G. Qofkii gudan waaya waajibaadka ka saran shuruudaha xeerkan iyo xaaladaha heshiiska la kala galay, waa suurtagal in shatigiisa lagala noqdo ama la tir-tiro
   **H. Dhamaan lacagaha kor xusan oo ganaaxa looga qaado kalluumaysatada waxa la waafajinayaa habraaca wasaaradda Maaliyada ee jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.**

## QODDOBKA 31aad

## HANTI LA WAREEGID

1. Cid kasta ee gasha dembi culus, markii maxkamadi xukunto, markabka iyo qalabka uu dembiga ku galay waa lagala **wareegayaa**.
2. Kalluunka iyo noole-biyoodyada oo dhan ee laga helo dusha markabka waa lagala **wareegayaa**
3. Dembiyada hoos yimaada xeerarkan waxay hoos tegayaan maxkamad Soomaaliyeed oo awood u leh qaadida dacwadahaas.

## QEYBTA 6AAD

## QODDOBKA 32aad
## XAL MUSHKILADEEDYADA

Haddii uusan dembigu ahayn mid keeni kara ganaax adag Wasaaaradda ayaa wada-hadal xal ah ku dhamaynaysa.

## QAYBTA 7 AAD

### Arrimaha la mamnuucay

### Qod. 33-aad
### Habka kalluumeysiga mamnuuca ah

1. Shabaagaha xaalufinta ee Maraakiibta Jariifka jiido waa ka mamnuuc biyaha kalluumeysiga Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya.
2. Shabaagaha lagu soo wareejiyo aag, cabbirka ishooduna ka yar yahay 50-mm marka si jan-jeer ah loo kala bixiyo waa mamnuuc.
3. Adeegsiga jilaabaha kalluun tarmiyaha (Sumaanta) ee gunta hoose ee badda, loona yaqaan Canqarta waa mamnuuc.
4. Adeegsiga qaraxa, korontada iwm waa mamnuuc.
5. Wasiirka ayaa xeer-hoosaad faah-faahsan ku soo saaraya habka & qalabka kalluumeysiga ee mamnuuca ah.

### Qod. 34-aad

### Ugaarsashada Naasleyda Badda & Qubada.

1. Qofna ma dili karo, ceyrsan karo ama waxyeeli karo naasleyda badda iyo qubada.
2. Qofna ma qaadan karo, kamana ganacsan karo naasleyda badda & Qubada xaalad nolol ama dhimasho.
3. Kalluumeysatada iyo bulshada xeebleyda ah waxaa ku waajib ah inay dib u celiyaan Naasleyda badda iyo Qubada ku xanibma biyaha iyo dhulka xeebta.
4. Waxaa la mamnuucay ka ganacsiga ugxanta & qolofta qubada.
5. Lama degi karo, hawlgal kalena lagama fulin karo goobaha tarmida ee naasleyda badda iyo qubada.
6. Haddii si kama ah ay naasleyda badda iyo qubada u galaan shabaagta ama dabin kale waa in sida ugu dhaqsaha badan loo sii daayaa, dibna loogu celiyaa biyaha.

7- Wasiirka ayaa wareegto ku soo saaraya noocyada naasleyda & qubada ee ilaalinta u baahan.

### Qod. 35-aad

### Wasakhaynta Biyaha Kalluumeysiga

1. Qofna si bareer ah ama kama' ah uguma shubi karo/dhigi karo shey ama wasakh biyaha kalluumeysiga Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya, taasoo:
    B) Waxyeeleysa kheyraadka badda, shimbiraha, deegaanka iyo dadka.
    T) Carqaladaynaysa kalluumeysiga.
    J) Khatar gelin karta socdaalka badda.

2. Marka ay dhacdo in shey ama wasakh la dhigo ama lagu shubo badda si kama' ah, waa in Naakhuudaha ama Mas'uulka Gaadiidka si degdeg ah warbixin u soo gaarsiiyaa Wasaaradda Kalluumeysiga, warbixintaasoo xambaarsan macluumaadka:
    C) Magaca war soo tebiyaha;
    T) Magaca, baaqa iyo calaamadda gaadiidka;
    J) Nooca sheyga iyo wasakhda;
    X) Saacada iyo taariikhda
    Kh) Iyo goobta.

## Qod. 36-aad

## Burburinta Qolof-qareedda

1. Qofna ma guran karo, kamana ganacsan karo Qolof-qareedka cunnada iyo hoyga u ah noolaha badda.
2. Waxaa la mamnuucay adeegsiga biraha goddodka lagaga soo saaro bahda-aargoostada, kuwaasoo waxyeela qarka iyo qolof-qareedka.
3. Waxaa la mamnuucay jilbaha waaweyn ee loo adeegsado kalluunka ku nool gunta hoose ee biyaha kalluumeysiga, kuwaasoo waxyeela qarka & qolof-qareedka.
4. Waxaa la mamnuucay xirfad kasta oo kalluumeysi, taasoo keeni karta burburin qolof-qareedka biyaha kalluumeysiga Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya.
5. Qoddobkan ma khuseeyo hawlgalada horumarinta ee dib u bacriminta qolof-qareedka, kuwaasoo laga fulinayo goobo ay Wasaaradu callaamadaysay.

## Qod. 37-aad

## Waxyeelidda Dhirta ka baxda xeebaha

1. Qofna ma jari karo, kamana ganacsan karo dhirta ka baxda xeebaha, taasoo cunno u ah noolaha badda, isla markaana xeebaha ka ilaalisa dhul go'a ama boholaha iyo ciidda oo fidda.
2. Qofna uma degi karo goobaha dhir xeebeedu ka baxdo si hoy, ganacsi, baaris ama hawlo kale ah haddii aan Wasaarada Kalluumeysiga ruqsad laga helin.
3. Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda ayaa go'aan kasoo saaraya goobaha loo aqoonsaday deegaan dhireedka.
4. Waxaa la mamnuucay wasakhaynta deegaan xeebeedka oo ay ku jiraan goobaha dhirta, biyo mareennada, goobaha bacriminta iyo tarmida.

## Qod.38-aad

**Ka hawlgelinta Gaadiidka Kalluumeysiga Shisheeyaha**

1. Gaadiid walba oo kalluumeysi ajnabi ah oo loo ogolaaday kalluumeysi gudaha biyaha kalluumeysiga Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya waxaa laga hawlgelinayaa kalluumeysato wadani ah.
2. Iyadoo la eegayo baaxada gaadiidka kalluumeysiga, Wasiirka ayaa go'aaminaya tirada kalluumeysatada ee ka hawlgeli karta gaadiidkaas.
3. Kalluumeystaha wadaniga wuxuu la xuquuq noqonayaa kalluumeysatada ajnabiga ah.
4. Kalluumeystuhu wuxuu hoyga, cunnada iyo daryeelka caafimaadka ku leeyahay Gaadiidka uu ka shaqaynayo.
5. Kalluumeystaha Wadaniga ah waxaa laga qaadayaa Dekedda, waxaana dib loogu soo celinayaa isla goobtaas.

## Qod.39-aad

**Ka shaqaynta gudaha dalka**

1. Qofna, Shirkadna ma shaqaalaysan karto kalluumeysato ajnabi ah haddii kalluumeysatada wadaniga ah shaqadaas ay qaban karaan.
2. Shaqaale kalluumeysi ajnabi ah kama hawlgeli karo biyaha iyo gudaha dalka Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya haddii aan ogolaansho laga helin Wasaarada kheyraadka dalka.
3. Shirkadaha kalluumaysigu waxay idaacdaha iyo wargeysyada ka dalbanayaan shaqaalaha ay u baahan yihiin.
4. Haddii dalka gudihiisa laga waayo shaqalaaha ay u baahan yihiin, waxay dalab u dirsan karaan dibada marka ay wasaaraddu ogolaato
5. Shaqaale kasta oo ajnabi ah waxaa loo dalbayaa ogolaansho uu bixinayo Wasiirka ka dib marka la bixiyo khidmada ogolaanshaha.
6. Shaqaale kalluumeysi ajnabi ah waxaa la marsiinayaa nidaamka dal soo gelida ee JamhuuriyadaJamhuuriyada Federalka Soomaaliya, baaritaan caafimaad iyo mid dambi gelid.

# QEYBTA 9AAD

## QODDOBKA 40aad

**XALALKA**

Wasaaraddu waxay samaynaysaa wareegto la xiriirta maareynta ku habboon iyo horumarinta shaqo kasta ee kalluumaysi.

## QODDOBKA 41aad

## AWOODDA FULINTA XEERKAN

Ciidamada Badda Soomaaliyeed ayaa leh awoodda iyo fulinta xeerkan.

## Qod.42-aad
## Xeer hoosaadyada

**Xeerkan wuxuu yeelanayaa xeer-hoosaadyo lagu soo saari doono Wareegto Wasiir, kuwaasoo si gaar ah u faahfaahinaya hawl kalluumeysi gaar ah ama mid la xiriirta khayraadka badda ee Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya sida:-**

1. Xeer hoosaadka Diiwaangelinta iyo la socodka Gaadiidka Kalluumeysiga.
2. Xeer hoosaadka xamaaratada
3. Xeer hoosaadka Qolofleyda
4. Xeer hoosaadka Naasleyda
5. Xeer hoosaadka Ilaalinta deegaanka noolaha dabar goaya.
6. Xeerka Goobaha Badda ee la dhawrayo iyo waqtiyeynta kalluumaysiga.
7. Xeer hoosaadka Qajaar-baddeed.
8. Xeer hoosaadka Suuqyada kalluunka, nadaafadooda iyo fayodhowrka guud.
9. Xeer hoosaadka dhawrista Dhirta, Shimbiraha & Jamalada badda.
10. Xeer hoosaadka noocyada kalluunka ee laga ganacsan karo.
11. Xeer hoosaadka Warshadaynta & suuqgeynta dibedda ee kalluunka.
12. Xeer hoosaadka dhaqangelinta, ka qaybgelida, wada shaqaynta iyo ka faa'iidaysiga dhaqaalaha loo qoondeeyey heshiisyada caalamiga ah ee ilaalinta iyo dhawrista badaha.

## QODDOBKA 43aad

## BAAB'IN

Waxaa la baabi'iyey Sharci kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan kalluumaysiga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## QODDOBKA 44aad

## DHAQANGAL

Xeerkan Kalluumaysigu wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu ansixiyo Golaha Shacabka (Baarlamaanka) federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo, dikreetana ku soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, kuna soo baxo Faafinta Rasmiga ah.